# Dhuuxidda Miisaanka Maansada

**Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd"**

## Hordhac

Dooddii beri dhowaa socotay ee ku saabsanayd miisaanka maansada soomaaliyeed heer sare iyo mid hooseba waa ay lahayd. Waxaa xog door ah lagaga helay maaddadaas iyo taariikhdeeda. Dhanka kalena fikraddu sida ay doontaba ha ku curato, ciddii doontaana ha bilawdee, waxaa caddaatay in ay ahayd sheeko waagaas ku dhex faaftay reer Lafoole. Taas dadka inoo xaqiijiyey waxaa ka mid ah Cismaan Aadan oo xogogaal ahaa. Waxtarkaas iyo qaar kaleba dooddani waa ay lahayd. Ha ahaatee intii ay socotay waxaa luntay isqaddarin badan, waxaana jirta mar ay gashay aflagaaddo gaadhsiisan in la isku sheego "baraar". Taas waxaa ka daran in la faduuliyey qoraallo kale oo aan masaladan shaqo ku lahayn.

Haddaba si aan la inoo doorin oo marka aynu wax ka hadlayno aynaan u noqon baraar iyo ugayb, aan taas ka hadho oo wax dhaama ka hadlo; aan inoo faalleeyo miisaanka maansada ee laga hadlayaa waxa uu yahay iyo sida uu yahay. Aniga oo aan maqaallada Gaarriye wada arag darteed, qormadan waxaan ku salaynayaa oo keliya baadhitaanka Carraale ee ku daabacan dhiganaha la yidhaahdo *Miisaanka Maansada Soomaaliyeed*.

Kolka ay noqoto aqoonta iyo baadhitaankeeda dhaqan ahaan laba arrimood oo keliya ayey maskaxda soomaalidu isku shuqlin jirtay, labadaas oo ahaa barashada diinta iyo curinta maansada. Dadaalka intaas dheeri wuxuu ahaa labadaas qaybiddooda. Diinta qudheedu waxay ahaan jirtay uun wax la barto, jeernaba laguma dhiirran heer baadhitaan iyo qoritaan. Mana jirin cilmi kale oo habaysan oo uu qofku u banbaxo kuna talaxtagaa. Qoraal la'aantii af soomaaliga ayaa noqon karta sababta koowaad.

Intii waayaha casriga ah la galayna wax guul ah oo muuqda lagama keenin aqoonaha cusub ee soo kordhay iyo adeegsigooda dhanka fekerka. Tusaale ahaan af soomaaliga in la qoray libin weyn ha ahaato, haddana waxay ahayd oo keliya far laatiin hore u abuurnayd oo la dhaqangeliyey, welina qabyo ah. Fartaas kolkii la hirgeliyeyna in wax door ah lagu qoray, loona gudbiyey tan iyo heer jaamaceed, iyaduna waa karti si wadajir ah looga wada qaybqaatay.

Sidaas darteed daahfurka miisaanka maansada oo qudh ah ayaa lagu sheegi karaa wax cusub oo ay maskax soomaaliyeed oo la hawlgeliyey daahfurtay. Taas ayaa ah waxa ugu weyn ee ilaa maanta ku dhacay culuunta af soomaaliga. Odhaahdaas waxaa iiga horreeyey suxufi wax ku qoray barta *Wardheernews.com*. Haddaba doodda daahfurkaas ku saabsan iyo lafagur lagu sii sameeyaa waxay lee dahay waxtar badan haddii loola dhaqmo sida habboon; sida habboonina waa in hore loo wado ee aan midhaheeda curdanka ah muran lagu qaadhin. Taas ayaa igu dhaqaajisay in aan arrinta halkan wax kaga idhaahdo.

Sababta kale ee qoraalkan ii dirtay waa buuggaas oo la isla qiray fahankiisu in uu ku adag yahay akhristaha caadiga ah. Adayggaasina wax kale ma aha ee waa isaga oo u qoran heer "akaademi", loona adeegsaday eray-tilmaameedyo cilmiyeed oo aan afka la iskula aqoon. Mar kalena waa baadhitaankaas oo khuseeya masalo dihin oo aan hore wax looga qorin. Kol saddexaadna waa sida aqoontaas loo soo gudbiyey oo aad u cufan, una baahan sii furfurid iyo baadhitaanno kale. Run ahaantii buuggaasi aad ayuu uga yar yahay aqoonta ku dhaansan baaxaddeeda.

Dhanka kalena, arrintuba in ay inagu cusub tahay ka sokow, buuggaa si loo fahmo waxaa loo baahan yahay akhriste markiisa horeba wax door ah ka yaqaan maansada lafteeda iyo abuurteeda. Ma aha buug uu nuxurkiisa heli karo qof ay masaladuba ku tahay bilaw haddii aan looga dhigin casharro kala horreeya. Haddaba qormadan waxaa loo adeegsan karaa ama loo kaashan karaa furfuridda iyo fahmidda xeerarka dhismaha maansada ee buuggaas lagaga baaraandegay. Waxay kale oo qormadani dardar gelin kartaa, aragtiyo cusubna ku dhalin kartaa, dadka miisaanka xiiseeya.

## Abuurta maansada ee aragtida Carraale

Carraale buuggaas wuxuu inagu baray maansada soomaaliyeed, jaadka ay doontaba ha ahaatee, in ay lee dahay oo ka alkumanto saddex heer oo aanay ka maarmin. Saddexdaas heer ama abuurood wuxuu ku kala magacaabay:

1. **Heerka dheellitirka tirada alan iyo tirada shaqal dheere (ee meeriska ku jirta)**
2. **Heerka tusmaynta shaqal dheeraha (meelaha uu shaqal dheeruhu meeriska ka gelayo)**
3. **Heerka hormaynta alammada (habaynta iyo kala horraysiinta shaqallada meeriska)**

Taasi waa wax qof walba oo maansoon kara ama maanso garan kara weligiiba dareenkiisa iyo garashadiisa ku jiray. Tusaale ahaan ma jiro qof uu dareenkiisu qaabka maansada run u dhadhansado oo gabay ku sheegi kara: *Ninka aan dan iga lahayn aniguna dan kama lihi.* Waxaa ka duwan in la yidhaahdo: *Ninka aniga iga maarmi kara uma muraad yeesho.* Sidaas waa la isla yaqaan mana aha wax la isbarayo. Halkan se waxa lagu daahfuray waa garashada, tilmaamidda iyo qeexidda waxa tusaalaha dambe gabay ka dhigaya ee tusaalaha hore ka duwayaa waxa ay yihiin, sida ay yihiin iyo meelaha ay meeriska kaga jiraan. Taas ayaa la soo saarayaa laguna dhisayaa xeerar leh caddaymo cilmiyeysan oo la raacayo, mar walbana natiijo sugani ka soo baxayso.

Haddaba saddexda heer ee uu Carraale dhismaha maansada ku baadhay innagu halkan waxaynu ku soo qadanaynaa labada hore oo keliya, sababta aynu ta saddexaad uga gaabsannayna dib ayeynu ka sheegi doonnaa.

## 1. Sargoynta erayga

Sida la wada og yahay af waliba wuxuu lee yahay heerar kala dudduwan oo midba jeer lagu dhaqmo, mid walba sidiisa lagu fisho laguna talagalo. Hadalka dhallinyarada iyo ka waayeelka, dadka afkaas wax ku bartay iyo dadka af kale wax ku bartay amaba aan waxba baran, intuba waa kala jaadjaad, waana la kala garan karaa. Waxaa la mid ah afka marka lagu hadlayo iyo marka la qorayo oo uu aad u kala duwanaado. Marka la qoray, oo weliba qof aqoon u leh kuna baraarugsani qorayo, wuxuu u gudbaa heerka ugu sarreeya, waxaana muuqda oo ay tahay in laga saaro wax alla wixii cillado iyo ceebo ku jiray, ciiladahaas iyo ceebahaas oo ay caadi tahay in ay hadalka galaan marka afka lagaga dhawaaqayo. Maansayahankuna, si walba oo uu afka iyo maansadaba ugu xeeldheer yahay, heerka uu maansada ku soo gudbiyaa waa kaa qaladaadka naxwe ka buuxa ee dhawaaqa. Inta aan arkay maansayahannada soomaalida burburinta naxwaha afka waxaa ugu dhalliil yar maansada Hadraawi. Wax kalena ma aha ee waa isaga oo marka uu tixda curinayo qora, taasina waxay ka saxdaa ama ka ilaalisaa laaxinka naxwe ee uu si aan feejignayn ugu dhici lahaa.

Haddaba waxaa jira xaalado badan oo uu naxwaha afka ku gurracan haddana maansada iyo hadalka caadiga ahba aad u gala, dhismaha meeriskana kaalin weyn ku yeesha, marar badanna lamahuraan ah. Arrimahaasi aad ayey u badan yihiin, kuwa uu Carraale inoo soo saaray waxaa ka mid ah:

1. Labada shibbane ee w iyo y abuur ahaan waxaa jirta xaaladogaar ah oo  ay shaqal ahaan u dhaqmaan — ama ay shaqal gaabka ka horreeya shaqal dheere u rogaan. Hoosta ka xarriiq *xaalado gaar ah,* waayo waxaa jirta marar kale oo badan aanay sidaas noqon. Run ahaantiina ma fududa labada xaaladood in la kala garto, dhadhansiga maansada oo qudha ayaana lagu kala saari karaa. Markaa, sida hoos ka muuqata, waa laga maarmayaa shaqaIka ay labadaas shibbane awel wateen haddii uu dheeraa in dherer loo qoro. Halkan waxaynu u daysanaynaa tusaale aad u habboon oo uu Carraale innaga siiyey jeerka ay labadaas shibbane sidaas yihiin:

Aabbow sidii Hoori-Gaab, Diiriyay gabaye*

Labadaas dhawaaq ee *bow* iyo *yay* sida muuqata waxay u dhacayaan *boow* iyo *yaay*. In ay sidaas tahay waxaa caddaynaya tusaalaha kore in loo rogi karo sidan hoose:

Aabbaba  sidii Hoori-Gaab, Diiriyaa gabaye

Xaaladdaas waxaa la mid ah innaga oo meeriskan hoose sidan u kala dhigna:

Galladdeeda oo dhow idday, gaadhi kari waydo
Galaddeeda oo dhaba haddana, gaadhi kari wayday

Sidan kale ayeynu u rogrogi karraa *ay:*daa shaqal dheeraha ah:

Weli gumucu meel baydhsan buu, gawda ku hayaaye
Weli gumucu meel leexsan buu, gawda ku hayaaye
Weli gumucu meel durugsan buu, gawda ku hayaaye

Mar walba se in aanay sidaas ahayn aynu ka aragno tusaalahan hoose ee ay ku jiraan afar *ay*, kuwaas oo labada goor ee hore shibbane noqday labada dambena shaqal:

Nin ambaday halkuu aaday way, ula ekoonayde

2. Sida la og yahay shaqalku mar waa shaqal gaab marna waa shaqal dheere. Haddaba haddii aynu hadalka kala mid dhigno daar la dhisayo shaqal dheeruhu wuxuu la mid yahay dhagax dhismaha ka gelaya in la eg laba jeer inta uu shaqal gaabku gelayo. Tabtaas oo kale dhisidda maansada laba shaqal gaab waxay ku fadhiistaan intii uu mid dheeri ku fillaan lahaa. Sababtaas darteed laba shaqal gaab waa lagu doorsan karaa mid qudh ah oo dheer, isweydaarintuna waa la mid, iyada oo aan meeriska waxba iska doorin. Tusaale:

Daar iyo markii ay dhisteen, aqallo daah weyn leh
Dadab iyo markii ay dhisteen, aqallo daah weyn leh

Gaadiidka waxa loo hor marin, ka u gadhqaad dheere
Gurgurshiyo waxaa loo hor marin, ka u gadhqaad dheere

3. Waxaa jira siyaalo erayga loo jebiyo oo kolka uu hadalka caadiga ah ku jiro lagu gaabsado marka uu maansada ku jirana dheellitirka lagu ilaashado. Sidaas aan naxwe ahaan habboonayn ee la isku tolay haddii la kala furo waxaa dhici karta meerisku in uu burburo. Tusaale ahaan:

Wixii gaalo sheegtaa markii uu, nagu gadoodaayey (meeris jaban)*
Wixii gaalo sheegtaa markuu, nagu gadoodaayey (meeris cuddoon)

Daaddihinta maansada
Ninba sida uu u doogdhabo (meeris jaban)
Taariikhda duugga leh
Waa daabac ugu yaal

Daaddihinta maansada
Ninba siduu u doogdhabo (meeris jaban)
Taariikhda duugga leh
Waa daabac ugu yaal

Daaddihinta maansada
Ninba sidu u doogdhabo (meeris cuddoon)
Taariikhda duugga leh
Waa daabac ugu yaal

Daaddihinta maansada
Ninba suu u doogdhabo (meeris cuddoon)
Taariikhda duugga leh
Waa daabac ugu yaal

4. Waxaa jira qaab-hadalyo ama hab-dhawaaqyo afka si jaban u gala iyada oo lagu fududaysanayo, kuwaas oo hadhowna maansada u gudba. Qaab-hadalyadaas uu Carraale inoo soo saaray waxay kala yihiin:

b) in shibbanaha *h* laga dul boodo oo xarafka xiga lagu dhaco:

Golaha baanistiisiyo intii, geed innagu raacda
Gumaystaha intii diiddan baad, gacal wadaagtaane

Golaa baanistiisiyo intii, geed innagu raacda
Gumaystaa intii diiddan baad, gacal wadaagtaane

Mid indhaha cirka u taagayoo samada eegaaya
Mid indhaa cirka u taagayoo samada eegaaya

Carro bahalo leh iyo waxay mareen meel cidhiidhiyaha
Carro bahalo liyo waxay mareen meel cidhiidhiyaha

Shibbanaha *h*, sidiisaba, kolka shaqal gaab ku reebmo af soomaaliga aad ayuu u dhibaa, marka maansada la joogana waaba uu ka sii xagjiraa. Sidaas darteed waxaa badan inta uu qarsoomo. U fiirso:

Tulud geel ah oo la dhacaad
Tulud geela oo la dhacaad

t) in xarafka *y* iyo shaqal ka horreeya lagu doorsado shaqalka e oo qudh ah:

Garasow adaan kula hadlaye, gacalkayow heedhe
Garasow adaan kula hadlee, gacalkayow heedhe

Waan ku maalaye
Bal adna i mudo

Waan ku maalee
Bal adna i mudo

j) in laba eray labadooda alan ee deriska ah la isku sidko:

Afcas baa miyiga loo farraqay laysku aayiro e
Afcas baa miyiga loo farraqay la isku aayiro e

x) in ay xaaladaha kore qaarkood ama dhammidood isbiirsadaan. Bal u fiirso inta heer ee meeriskani marayo si uu hadal caadi ah uga baxo oo meeris gabay u noqdo:

1. Afka uun baad ka leh dahay ee tixuhu arar ma yeeshaane (meeris jaban)
2. Afkuun baad ka leh dahay ee tixuhu arar ma yeeshaane (meeris jaban)
3. Afkuun baad ka lee dahay ee tixuhu arar ma yeeshaane (meeris jaban)
4. Afkuun baad ka lee dee tixuhu arar ma yeeshaane (meeris culus)
5. Afkuun baad ka lee dee tixuu arar ma yeeshaane (meeris cuddoon)

Xaaladahaas iyo kuwa la midka ahi run ahaantii aad ayey u badan yihiin.

Carraale xaaladahaas aan caadiga ahayn ee uu soo saaray maansaduna ku dhisanto waxaa ka mid ah xaalad uu u bixiyey **farcame**. Xaaladdaa oo dhammaan jaadadka maansada gashaa waa in alan dheer la geliyo meel mid gaaban looga baahnaa. Taasi waxay khasabtaa alankaas dheer marka lagu dhawaaqayo in codka lagu xado oo mid gaaban loo rogo. Cilladdaas wuxuu inagu tusaaleeyey:

9:3 Sida Eebbahay kuu jirrabay, mari jawaabteeda*
9:4 Siduu Eebbahay kuu jirrabay, mari jawaabteeda

11:1 Ninka aniga iga maarmi kara, uma muraad yeesho*
11:2 Ninkii aniga iga maarmi kara uma muraad yeesho

10:2 Gartad Maxamed Nuurow naqdee, galuhu noo keenay*
10:3 Gartaad Maxamed Nuurow naqdee, galuhu noo keenay

Aynu u sii wada fiirsanno labadan meeris ee arrintaas kore waxa inaga sii tusaya. Labada tusaale ka hore waa la gaabiyey, ka dambena waa la dhammaystiray, waayo marna miisaanka ayaa diiday marna oggolaaday:

Nin hadduu go'aankiyo sharciga, gawrac ugu jiido

Guudaan haddii uu ku liqo, erayga geedaysan

Wuxuu kale oo Carraale inoo sheegay farcamahaasi marka gabayga la joogo in uu ku eg yahay hojiska oo aanu u gudbin hooriska. Tusaale ahaan:

Hareer baaba laysaga duwaa, waxaan habboonayne* 6:3
Hareer baaba laysaga duwaa, waxan habboonayne 6:2

Ha yeeshee arrintaas haddii aynu u fiirsanno waxaynu ogaanaynaa xaaladdaas uu qoraagu farcamaha u bixiyey sida ay hojiska ku tahay qudheeda in ay hooriskana ku tahay. Labada jeerba alanka dheer in la gaabiyo waa khasab, laakiin gaabinta ayaan hojiska uga muuqanayn sida ay hooriska uga muuqanayso. Waayo, sida uu isaguba sheegay, hojisku wuu dheer yahay oo ceebta wuu qarsan karayaa, halka ay hooriska aad uga muuqanayso dabadeed dhiskiisa jebinayso haddii aan la gaabin.

Mar haddii ay sidaas tahay labada jeerba shaqal dheeraha in la gaabiyo waa loo baahanayaa, xitaa kolka la qorayo. Shaqallada uun ma aha ee run ahaantii aad ayeynu maansada ugula kulannaa erayada oo aad loo jarjaray oo laga soo reebay in yar oo geli karta meel looga baahnaa. Kolkaa meerisyadaa kore iyo kuwo kaleba sidan ayey noqonayaan:

Ninki(i) aniga iga maarmi kara, uma muraad yeesho

Sidu(u) Eebbahay kuu jirrabay, mari jawaabteeda

Garta(a)d Maxamed Nuurow naqdee, galuhu noo keenay

Haamaha wax(aa) lagu teediyaa, hawlogaadyada e

Labadaadi(i) daan iyo afkii, daadku kala qaadye

An(iga) se ila ah aakhiru sabaan, iligyadiisiiye

An(igu) ka quustay soomaalidii qudhunka weynayde

Id(in)na iga aqbala taagta waad iga arkaysaane

Bal dayaay shisheeye i dafay, an (iga) iga doorteene

Garashadu hadday ruux la tahay, s(ida)uu u garanaayo

Toojaba waxaa lagu godlaa, s(ida)ay u gaar tahaye

Mar uun bay gadooddaa sid(a)ay, gees lo'aad tahaye

Dhan kale haddii aynu ka eegno, xaaladdani shaqal dheere la gaabinayo uun kuma eka ee waxaa jira shaqal gaab haddii aan la dheerayn meerisku jabayo. Bal u fiirso meerisyadan Ina Cabdulle Xasan, Afqallooc iyo Yuusuf-Shaacir:

Mid cuucle ah mid ceesaan gadhle ah, cilin kabajaaya

Dagaag xoolo yeeshaa jiroo hodanna degaaye

Dawliilka waxaad shaabbahdaan dad iyo insaane

Habkii nolosha loo higsan jiray, weli ma haysaane

Sidaas ayaa af ahaan habboon hase yeeshee saddexda goorba waa ay jaban yihiin oo saddexda tusaale ee hore labadii shaqal dheere ee hojisku abuurta u lahaa mid baa maqan, tusaalaha afraadna halkaas waxaa ka maqan shaqal dheere. Kolkaa gabyaagani waxay inagu sirayaan in ay *cilin*, *degaaye* , *insaane* iyo *higsan* codka ku xadaan oo shaqalka gaaban inta ay jiidaan mid dheer inooga dhigaan. Sidaas ayaa maansada dhisaysa afka haba ku jabnaatee. Waxay yidhaahdeen:

Mid cuucle ah mid ceesaan gadhle ah, ciilin kabajaaya

Dagaag xoolo yeeshaa jiroo hodanna deegaaye

Habkii nolosha loo hiigsan jiray, weli ma haysaane

Dawliilka waxaad shaabbahdaan dad iyo iinsaane

Tusaalahan hoose lama odhan karo sida afka ku hagaagsan "gugii", waayo miisaanka ayaa jabaya, sida aynu meel dambe ugu tegi doonno. Markaa shaqalka *u* ayaa la jiidaa oo waxaa la yidhaahdaa:

Guuguule
Guugii da
Geelii dhal

Haddaba xaaladdan in "farcame" lagu sheego malaha waxaa ka qumman in la raaciyo qodobbadii aynu hore u soo xusnay ee iyaga oo af ahaan qaldan maansada dhisa.

## 2. Dheellitirka tirada alan iyo tirada shaqal dheere

Af walba ay dad ku hadlaan wuxuu ka kooban yahay codad ama dhawaaqyo tirsan kuwaas oo marka ay iyaga oo si habaysan u wada socda afka ka soo baxaan sameeya macne la garanayo lana yidhaahdo *hadal*. Codadkaas afafku waa ay ku kala duduwan yihiin, af soomaaliguna wuxuu ka abuuran yahay 26 cod oo 21 ka mid ah lagu magcaabo shibbaneyaal shanta kalena shaqallo. Shanta shaqal mid walba waxaa jirta mar uu jiitamo ama dheeraado, kolkaasna waxaa loo yaqaan shaqal dheere.

Hadalkaas afka ka baxa ee maqalka la iskula garto markii la doonay in loo rogo qoraal akhriska la iskula garan karo, lix iyo labaatankii cod ayaa mid walba la siiyey astaan lagu magacaabo *xaraf*. Shibbaneyaasha waxaa astaamo looga dhigay xarfo sidan u dhigan: b t j x kh d r s sh dh c g f q k l m n w h iyo y. Shaqalladana waxaa lagu gartaa: a (aa) e (ee) i (ii) o (oo) iyo u (uu). Codadkii afka oo iyaga oo astaamahaas lagu qoray lagu magacaabay *far* ayaa noqday hadal akhris lagu fahmi karo.

Shibbane waxaa looga jeedaa cod aamusan (shib ah), wuxuuna shibta ka baxaa oo dhawaaq la maqli karo noqdaa kolka hore ama gadaal shaqal lagaga daro. Tusaale ahaan codka leh astaanta shibbanaha koowaad ee b waa codka ku qarsoon marka ay labada dibnood isku dhegsan yihiin. Kolka iyada oo shaqal la kaashanayo labadii dibnood la kala dhufto waxaa ka soo baxa codkii ku qarsoonaa oo noqda *ba* ama *be* ama *bi* ama *bo* amaba *bu*. Waxaana la mid ah haddii uu shaqalku dheeraado oo noqdo *baa* ama *bee* ama *bii* ama *boo* amaba *buu*. Taasi waa marka dibnaha oo is'haysta la kala dhufto. Haddii se la doono labada dibnood oo kala furan in isla codka b laga soo saaro waxaa la isku dhuftaa labadii dibnood iyada oo la adeegsanayo shaqal imika codka laga horraysiiyey, tusaale ahaan: ab, *eb, ib, ob iyo ub;* ama *aab, eeb, iib* iyo *uub*.

Sidaas darteed shaqalku waa tamarta uu afku ku shaqeeyo waayo isaga ayaa sameeya dhawaaqa hadalku ka dhasho. Tusaale ahaan erayga **maanso** sida aynu aragno waa dhisme ka samaysan shan dhagax oo kala ah saddex shibbane iyo laba shaqal. Saddexda shibbane haddii aan shaqal ku jirin waxba ma dhisi karaan waayo waa xaalad aamusan oo ah *mns*, saddexda shaqal se keligood waxay samayn karaan laba alan oo mid dheer yahay midna gaaban yahay kuwaas oo ah *aa-o*. Sidaas darteed cinwaanka qodobkan ee kor ku xusan waxaa looga jeedaa codadka ku jira erayada meeriska maansada iyo tiraddooda ayaa xukuma dhismihiisa iyo marka uu dhismo jaadka maanso ee uu noqdo.

Haddaba si aynu fahanka u soo dhowaynno qeexidda qodobkan waxaynu u soo koobaynaa si kollayba innagaga fillaan doonta ujeeddada.

Sida ay og yihiin dadka gabayga curin kara ama dhiskiisa cuddoon garan karaa meeriskiisu wuxuu ka abuurmaa miisaankan:

Hooyaalayeey hooyaleey, hoyalayeey hooye

Ama sidan kale oo islaa taas hore ah:

Hoobaalayeey hoobalayeey, hobalayeey hoobe

Erayga **hoobal** oo sida la og yahay maansada soomaalida oo dhan siyaabo kala duwan loogu ballaysimo waxaa la isla dhex maray in ay tahay rooxaan la rumaysnaa in ay curinta maansada shaqo ku lee dahay oo laga helo ama loo niyoodo. Magacaas oo mar kalena noqda **hooyal** waxaa laga yaabaa in uu ahaa ilaah ka mid ah ilaahyadii islaamka inooga horreeyey kaas oo maansada loo haystay. Magacani waxa uu la wadaago ilaahii Jasiiradda Carabta laga rumysnaa ee **Habal** waa arrin raadraac mudan halkan se aynaan kaga hadlayn.

Sida aynu ka aragno miisaankaas kore, wuxuu ka kooban yahay laba qaar oo hakad kala qaybiyo macnahoodu se isbuuxiyo. Taas wuxuu kaga duwan yahay jaadad maanso oo kale. Maansaduna guud ahaanba waxay u qaybsantaa qayb leh saddex qaar sida heesta kebedda, qayb leh laba qaar sida gabayga, iyo qayb aan meeriskoodu qaybsamin waayo wuu gaaban yahay sida geeraarka iyo jiiftada. Qaybta labada qaar leh inta hakadka ka horraysa waxaa lagu magacaabaa **hojis**, inta dambena **hooris**. Kuwa leh saddexda qaar iyagana waxaa loola dhaqmaa hojis iyo laba hooris. Waa la kasi karaa danta ku jirta magacbixinta hojis iyo hooris, waayo ka hore meeriska waa lagu hakiyaa, ka dambena waa lagu hooriyaa. Labadaas qaarna mid waliba wuxuu lee yahay xeerar uu ku dhismo.

Xeerka hojiska gabaygu aad ayuu isu rogrogaa, taas oo uu kaga duwan yahay hooriska. Haddaba salka hojiska oo ay gabayga intiisa badani ku dhisan tahay Macallin Carraale wuxuu soo saaray in uu ku yimaaddo shan weji oo kala ah: 7:5, 8:4, 9:3, 10:2 iyo 11:1. Innaguna intaa waxaynu ku daraynaa in uu jiro sal lixaad oo ah 12:0 sida aynu tusaalaha hoose ku arki doonno. Tirooyinkaas kore waxaa looga jeedaa, abuurta hojiska waxaa sal u ah lix siyood oo kala ah: in uu yahay toddoba alan oo ay shan ka mid ahi shaqal dheere tahay, siddeed oo ay afar ka mid ahi shaqal dheere tahay, sagaal ay saddex shaqal dheere tahay, toban ay laba shaqal dheere tahay, kow iyo toban uu mid shaqal dheere yahay, ama laba iyo toban aan shaqal dheere lahayn. Lixdaa wejina waa isla ka koowaad oo ururay ama ka 12-aad oo jiidjiidmay.

Hoos waxaa ku taxan lixda weji ee hojisku ku yimaaddo. Ogowna mar walba waxa aad tirsato ee hojisku yahay waa inta hakadka ka horraysa:

7:5 Gaagaabso oo aamus yaan, gaadh lagaa qabane

8:4 Lur adduunyo waa caawadaan, wax igu laabnayne*

9:3 Afar laba lix jeer buu sidaa, iiga loogsadaye*

10:2 Cilmi falagga way garan raggii, caalimka ahaaye

11:1 Lixdan aniga oo jiray tashiga, laydha iga raacay*

12:0 Bad wax mara barriga waxa jiriyo, buuro dabadooda

Taas haddii aynu sii qeexno, hojiska ugu sarreeya waxaa ku jira toddoba higgaadood oo ay shan ka mid ahi dhaadheer yihiin, waxaana aynu u qoraynaa 7:5 (Carraale wuxuu u qoraa 7,5). Intaas haddii ay wax iska dhimaan ama ku kordhaan meerisku wuu jabaa, marka laga reebo in halkii shaqal dheeraha ay galaan laba shaqal gaab taas oo aan waxba beddelayn. Xeerkaas ayaa weligeedba lagu wadayaa, weligiibana hojis gabay intaa ma dhaafo.

Salka 12:0 aad ayuu maansada ugu yar yahay, ha ahaatee jiritaankiisu in uu sugan yahay muran kama taagna.Caddaymo door ah ayeynu taas maansada soomaalida uga heli karraa, amaba si fudud ayeynu u halabuuri karraa meeris aynu ku wada qanacno. U fiirso tusaalahan labaad:

12:0 Gudgudaha na maray xalay ka negi, geeddi reeruhuye**

Kan 11:1 ah isagana waa aynu u rogi karraa 12:0:

11.1 Gebagebaha lay dhigay khalqigan, haaddu guranayso
12.0 Gebagebaha la i dhigay khalqigan, haaddu guranayso

Sababta koowaad ama ta qudh ah ee keentay gadgaddoonka hojiska Carraale wuxuuu u cuskaday in uu ka dheer yahay ama ka shaqallo badan yahay hooriska, taasina ay siinayso mug uu ku qaadan karo xeerar kala duduwan oo salal la isku yidhaahdo, iyo haddana awood uu ugu dulqaadan karo farogelin aan sal u ahayn oo iyagana farcameyaal lagu magacaabo.

Hoorisku isaguna waa 6:2, oo laga wado wuxuu ka kooban yahay lix oo ay laba ka mid ahi tahay shaqal dheere. Tusaale ahaan:

Dad musbaar dhegaha kaga jiraan, maqal ku tuugaaye 6:2

Waxa aad aragtaa hoorisku (inta hakadka ka dambaysa) in uu ka samaysan yahay lix higgaadood oo ah kuwa hoosta ka xarriiqan. Lixdaas afar ka mid ah waa shaqal gaab waana *ma, qa, ku, ye,* iyo laba shaqal dheere ah kuwaas oo kala ah ***tuu*** iyo ***gaa.*** Sababtaas ayaa hooriska loogu bixiyey 6:2 (lix-labaale). Labadaas shaqal dheere barta ama tusmada ay hooriska ka gelayaan kol walba halkaas ay imika ku jiraan ma galaan, taasna xeerkeeda waxaa ina baraysa arrin loo bixiyey **tusmaynta shaqal dheeraha.**

Waa intaas dheellitirka shaqalka hoorisku, taasna wuxuu kaga duwan yahay hojiska oo sidii aynu soo aragnay aad isu gadgaddiya. Si walba oo uu hojisku isu dooriyana wax saamayn ah kuma yeesho hooriska, haba yaraatee, sida kalena waa la mid, waayo dhismahoodu wuu kala madaxbannaan yahay. Taas macnaheedu waxaa weeye, sida aad doonto ayaad ula dhaqmi kartaa meeriska goosankiisa hore ee ah: *Dad musbaar dhegaha kaga jiraan*, adiga oo aan haba yaraatee waxba u dhimin goosankiisa dambe ee ah: *maqal ku tuugaaye*.

Taasi waxay oggolaanaysaa in la isu geegeyn karo hojisyo iyo hoorisyo iyo xitaa meerisyo dhan oo tixo kala duwan ku kala jira, haddii ay isku qaafiyad yihiin, dabadeed gabay cusub laga soo dhex saaro. Markaas ka dib in ay macno dhan yeeshaan iyo in ay yeelan waayaan waa masalo kale. (Tusaale!) Xaaladdani waa ta keentay in tixo aan qaafiyadda mooyee wax kale wadaagin la isku cayn iyo bayd gooyo amaba la isku qalqaldo. Waxaa ka mid ah labada tixood ee dh:leyda ah ee Salaan-Carrabay iyo Cali-Dhuux. Waxaaba dhacda in tixo aan xitaa isku qaafiyad ahayn la isku walaaqo haddii ay wadaagaan miisaan, ujeeddo iyo shubaal. Tusaale ahaan heellada caanka ah ee dabayaaqadii afartannadii qarnigii tagay uu curiyey Yuusuf Xaaji Aadan Qabille waxaa jira dad ku dhex qalda meerisyo kale oo tixo dambe ku jiray. Yuusuf erayadiisa heestaa waxaa ka mid ahaa:

Soomaaliyey toos oo
Toos oo isku tiirsada
Hadba kiinna taag daran
Taageera weligiin

Tulud geela oo la dhacaad
Toogasho u badheedhaane
Ma dalkaa dhanee tagay baan

Ninna dhagax u tuurayn

Tixdaas ayaa goor dambe lagu dardaray meerisyo la miisaan ah isku sina loogu luuqeeyey aan se la qaafiyad iyo dabci ahayn. Tuducyada caanka ah ee tixda lagu daray waxaa ka mid ah:

Waxa aan la ooyayaa
Ilmadu iiga qubanaysaa
Ikhtiyaar nin loo diidoo
La addoonsadaan ahay

Waa ay muuqataa labada maanso sida ay u kala duwan yihiin: garaad ahaan, nafsad ahaan, dhaqan ahaan iyo qaafiyad ahaan intaba.

## 3. Tusmaynta

Waxaynu soo aragnay meeriska maansada inta cod ee ku jirta iyo codadkaas intooda shaqal dheere noqotaa in ay abuurto dhismihiisa, iyo jaadka maanso ee uu noqonayo. Heerkaas waxaa loo bixiyey dheellitir. Ha yeeshee dheellitirkaasi keligii ma go’aamiyo cuddoonida iyo jaadka meeriska, wuxuu se u baahan yahay in uu kaashado arrin kale. Arrintaas kale waa tii uu Carraale u bixiyey *tusmayn*, waana meesha ama meelaha shaqal dheeruhu gelayo. Tusmayntu sidii la inoo soo carrabbaabay waa meesha ama meelaha uu shaqal dheeruhu meeriska ka gelayo.

Bal haddaba horta u fiirso meeriska mararka qaarood haddii eraydiisa la isdaba mariyo sida aan waxba isu doorinayn:

8:4 Adba Caalinow jiidatoo, jaalkay maad noqone* 6:2
8:4 Adba jiidatoo Caalinow, jaalkay maad noqone 6:2

Kol kalena u fiirso haddii sidaas hore oo kale la yeelo waxa dhaca:

8:4 Geeluba Ugaasoy hadduu, ayda miranaayo* 6:2
8:4 Ugaasoy geeluba hadduu, ayda miranaayo 6:2
8:4 Hadduu geeluba Ugaasoy, ayda miranaayo 6:2

Sida aynu aragno erayada iyo shaqalladu kolka dambe saddexda jeerba waa isku intii haddana meerisku labada jeer ee dambeba wuxuu ku jabay isweydaarinta erayda “geeluba”, “Ugaasoy” iyo “hadduu”. Taasi waxay caddaynaysaa dheellitirku keligii in aanu maansada abuuri karin ee loo baahan yahay arrin kale. Arrinkaas kale waa ilaalinta tusmaynta oo ah baraha ay alammadaasi sadarka kaga kala dhacayaan, amaba guud ahaan sida ay kuwa dhaadheer iyo kuwa gaagaabani isu qaybinayaan.

Tusaalaha hore labada eray ee la isdhaafiyey ee kala ah ”Caalinow” iyo ”jiidatoo” waa isku dheellitir (3:1), waana isku tusmo (1, 2), sidaas darteed waxba kuma jabna in tusmooyinka la isweydaariyo (xusuusnow dhawaaqa ’-ow’ halkan in uu yahay shaqal dheere). Waxaa ka duwan tusaalaha labaad kaas oo erayada la isku doordooriyey kala dhis duwan yihiin.

Labada jaad ee hoose oo kala ah **baarcadde** iyo **caano lulid** si walba waa isugu dherer iyo dhumuc, waxayna wadaagaan shan weji oo labadaba sal u ah. Haddana habdhacoodu cirka iyo dhulka ayuu isu jiraa. Ma jiro tusaale ka weyn oo lagu ogaan karo tusmaynta iyo sida ay muhiim u tahay. U wada fiirso labada heesood:

**Baarcadde:**

6:4 Ninkii waallaa la waa
7:3 La waayoo la heli waa
8:2 Bal naagtaa badhida daya
9:1 Bal buluqbuluqdeeda daya
10:0 Hoh iyo Boholaha Xargega

**Caano lulid:**
6:4 Naa baayo naa baayo
7:3 Naa yaan ku baalidine
8:2 Yaan bilistu ii shirine
9:1 Waa maxay isgiringirintu
10:0 Baranbaradu kugu xayane

Tusmaynta maansadu iyada oo aad u ballaadhan, istusaalaynteeda aynu kaga ekaanno in yar oo gabayga ah.

Sidii aynu dheellitirka ku soo aragnay hojiska iyo hoorisku heer walba oo la joogo waa kala xeer. Waxaynu kale oo ogaannay hojiska salkiisa koowaad in uu yahay 7:5 (toddoba alan oo laba shaqal dheere tahay). Haddaba marka ay tusmaynta noqotana waxaa reebban shaqal dheere in uu galo tusmada 3-aad iyo 6-aad. Tusaalahan hoose ayaa taas muujinaya:

7:5 Geedjoogyadoodii haddaan, gudurigaw loogay

Waxaynu se soo aragnay salkaasi in uu tarmo oo sida uu marba shaqal dheere isugu rogayo laba shaqal gaab uu gaadho 12:0. Haddaba dhaqdhaqaaqyada badan ee ay shaqal dheerayaashu tusmooyinka ka dhex samaynayaan iyaga oo aad u badan mid walba hal tusaale oo keliya aynu ka soo qaadanno sida hoos ka muuqata:

7:5 Oo aan gadiid maalintii, soo hadhgelahaynin* (1, 2, 4, 5, 6)

8:4 Oo aan gadiid maalinnimo, soo hadhgelahaynin (1, 2, 4, 5)

9:3 Oo aan guddidu maalin qudha, geedka imanaynin (1, 2, 6)*

10:2 Oo aan guddida magaca lihi, geedka imanaynin (1, 2)*

11:1 Aan galab guddida magaca lihi, geedka imanaynin (1)*

12:0 Galab qudha guddida magaca lihi, geedka iman mayso (0)*

Taasi waa tusmaynta shaqal dheeraha hooriska. Kolka hooriska la joogana, waxaynu ogayn in uu yahay 6:2 (lix alan ay laba shaqal dheere tahay). Haddaba labadaas shaqal meel walba ma galaan oo waxaa ka caaggan tusmada 2-aad iyo ta 6-aad, waxayna u kala gooshaan afarta tusmo ee kala ah: 1-aad, 3-aad, 4-aad iyo 5-aad. Afartaas ayey sida hoos ka muuqata talantaalli ugu wareegaan iyaga oo ay khasab tahay saddexdaa siyood midkood in ay isu raacaan:

Anaa idhiye yeel waa wixii, aabbaheed dilaye** (1, 3)

Magaaladu mugweynaa maxaa, sheekh muftiya jooga (1, 5)

Bal garwaaqso warankaad gantiyo, gedaha aad joogto (4, 5)

Intaas oo keliya ayeynu kaga hadhaynaa tusaalaynta ku saabsan dheellitirka iyo tusmaynta gabayga. Qofka se doonaya in uu aqoon intaas dhaafsan ka helo ha raadiyo buugga "Miisaanka Maansada Soomaaliyeed" halkaas oo jaadadka maansada oo dhan lagaga baaraandegay.

## Geeraarka:

Miisaanka geeraarkana Macallin Carraale wuxuu ku fadhiisiyey saddex sal oo kala ah: 6:3, 7:2 iyo 8:1. Haddaba baadhitaankiisan waxaad mooddaa niyadda iyo fiirada badan ee uu gabayga u huray in uu geeraarka kala wahsaday ama kala dhabcaalay. Taasi waxay ka muuqataa xeerkan oo dhaliil laga soo saari karo.

Geeraarku sidiisaba wuxuu yeeshaa siyaalo dhawr ah oo luuqdiisa kii la doono lagu hooriyo, siyaalahaas oo dabadeed kala duwa inta alan ee meeriska gelaya. Tusaale ahaan iyada oo awrka rarayga ah saddex siyood marba tii la doono loola hadlayo waxaa la yidhi:

6:2 Inta doonnida qaad
6:2 Sida daad u sabbee

7:2 Inta doonnida qaade
7:2 Sida daad u sabbeeye

7:3 Inta doonnida qaadoo
7:3 Sida daad u sabbeeyoo

7:3 Inta doonnida qaadow
7:3 Sida daad u sabbeeyow

8:2 Inta doonnida qaadiyo
8:2 Sida daad u sabbeeyiyo

Shantaa siyoodba waa ay cuddoon yihiin. Kolkaa heerka koowaad ee 6:2 ayaa la odhan karaa run ahaantii waa salka dhabta ah ee geeraarka.Tusaale ahaan iyada oo ay qumman tahay in la yidhaahdo:

Geeraar waa igu Ceeg

Waxaa loo baahday in hadal kale lala xidhiidhiyo, dabadeed waxaa soo kordhay alan dheeri ah oo ah:

Geeraar waa igu Ceegoo

Wa ii ciidda Dubaaroo

Wa ii caanaha geeloo

Way cir hooray diraacoo

Way caleenta dhiraayoo

Way cawskii Madaxweyn

Gabayga aynu wax ka soo aragnay oo keliya ma aha ee buugga *Miisaanka Maansada Soomaaliyeed* wuxuu Carraale aad ugu baadhay inta badan jaadadka maansada.

## 4. Hormayntu ma jirtaa?

Qodobka ama heerka saddexaad ee uu Macallin Carraale baadhitaankiisa ku saleeyey oo ah *hormaynta* isaga run ahaantii waxay u eg tahay in laga maarmi karo, waayo nuxurku waa isla qodobka *tusmaynta*. Haddii la bartay tusmooyinka loo baahan yahay in ay shaqal dheerayaashu meeriska ka kala galaan, waxba kuma kala duwana meeris awelba dhisnaa in erayadiisa la isu guurguuriyo iyo in hadal cusub debedda laga keeno.

In kolka meeris la jejebiyo laga dhisi karo jaad kale oo maanso, waxba kagama duwana in hadal debedda laga keenay meeris cusub laga curiyo. Labada jeerba waa erayo la isu soo ururiyo dabaddeed meelaha ay ku habboon yihiin lagu hagaajiyo. Tusaale ahaan maxaa laga dheefayaa in heellada hoos ku qoran loo rogo ama loo rogi karo hojis gabay?

> Heddii gacantaan ku haystaa
> Gacantaan ku haystaa heddii, caashaqay helaye
>
> Wardheer dal wanaagsanaydaa*
> Dal wanaagsanaydaa Wardheer waa horaan tegaye

In ay meesha oolli lahaayeen erayo kooban oo la isla og yahay keligoodna adeegsigooda lagu khasban yahay ayaa keeni lahayd in iyaga la rogrogo oo marba jaad kale oo maanso lagu qaabeeyo. Markaa arrinku wuxuu ku soo ururayaa tirada alammada (dheellitirka) iyo sida ay alammadaasi meeriska isugu dhex qaybinayaan (tusmaynta).

Taa waxaa ka duwan oo aqoon laga korodhsan karaa ogaanshaha dhiska meeriska ama labadiisa qaar midkood wuxuu la wadaago abuur ahaan dhismaha jaad kale oo maanso. Halkaa waxaa laga soo saari karaa labadaas jaad sida ay u kala dhambalmeen iyo sida ay isku abuur u yihiin, taas oo iyadana markeeda lagu sii baadhi karo guud ahaan maansadu asal ahaan sida ay ku timid, isbeddellada ku soo dhacay, iyo sida ay u kala tafiirmatay una kala fac weyn tahay. Hooris gabay in uu sidiisa u yahay hooris selel, iyo hojis gabay in uu yahay jiifto ay laba cod ku kordheen, ayaa ka mid ah arrimaha fiiradooda wax lagala bixi karo.

## Jadadka kale ee maansada
### Jiiftada:
Gabayga ka dib jaadadka kale ee maansada ugu mudan uguna badani waa jiiftada. Jiiftadu sida ay u nud gaaban tahay, sida ay u wejiyo badan tahay ee dano iyo codad badan oo kala duwan loogu adeegsado, iyo sida ay jaadad kale ugu dhex milan tahay, intuba waxay caddaynayaan in ay ka mid tahay kuwa ugu fac weyn. Carraale wuxuu qoray:

> ”Koritaanka cilmiguna, sida kaskuba inoo sheegi karo, waxa uu ka abuurmaa wax fudud una kobcaa wax adag. Kolkaa waxa aynu malayn karnaa in ay qaybaha maansadu sida ay u kala nud yar yihiin u kala horreeyeen.(...) Meeriska jiiftada marka laba cod lagu daro waa hojis gabay, waxaana la odhan karaa gabayguba jiifto ayuu ka yimi ama jiifto waa gabay dhiman.”

Haddaba meeriska jiiftadu wuxuu ku dhisan yahay sagaal alan, sagaalkaas oo ku yimaadda shan siyaalood oo ah sidan:

5:4 Deelley durbaanley
6:3 Dawo caafimaadley
7:2 Garashow dahsoonley
8:1 Dahab iyo dun boqorley
9:0 Ma la dumay ma lagu diday

Miisaankaas jiiftada waxaa ka wada tirsan heesaha kala ah:

**Batarka:**
5:4 Goormuu gudaayaa
6:3 Gorgor baannu joognaa
7:2 Batar waa nin bawsaday
8:1 Afyar naasku ugub yahay
9:0 Gole lagama odhan karo

**Heesta cawska:**
Luuqdan cawska oo jiifto ah waxaan ku xoojinayaa tusaalaynta labada sal ee 5:4 iyo 9:0 kuwaas oo buugga Carraale ka maqan. Iyaga oo meeriska koowaad wato luuqda iyo jiibta waa sidan:

5:4 Maadhii Xaguugaad-(dow), hoyal**
6:3 Cawskanow sabool diid
7:2 Dadku waa dadkii hore
8:1 Soddon lagugu baayicin
9:0 Salladaha la wada simay**

Carraale dhan kalena wuxuu ina tusay qayb kale oo ay heesta baarcadde hooyo u tahay, kuwaas oo ujeeddada loo qaado iyo luuqda la kala duduwo qaarbana waxaana ka mid ah ta carruurta lagu sabaaliyo iyo ta saarka loo yaqaan. Salkeedana wuxuu ka dhigay shan kala ah: 7:5, 8:4, 9:3, 10:2, 11:1. Ha ahaatee sidaas waxay noqotaa haddii ciyaar ahaan loogu luuqeeyo, haddii se jirridda dhismaheeda oo qudha lagu ekaado runtu waxay noqonaysaa si kale.

Sideedab heestani waxay yeelataa laba habdhac oo wada socda. Waxaana la odhan karaa xilligii lagu ciyaari jiray ayey sidaas abuurantay, iyada oo laga yaabo ninka baarcaddaynaya ee cayaarta loo tumayo iyo hablaha u tumayaa in ay laba siyood ugu luuqayn jireen, dabadeed ay laba miisaan yeelatay. Tusaale ahaan habluhu haddii ay yidhaahdeen meerisyadan oo aynu luuqdii ka reebnay:

Ninkii waallaa la waa
La waayoo la heli waa
Ma daar baa lagu qafilay
Miyuu duuloo la dilay
Ma duunyoo soo wadaa

Barbaarkii baarcaddaynayey isaguna wuxuu yidhi:

Haddaan casarkii carraabo
Haddaan dawga cagta saaro
Cid uun baan heli lahaaye
Casaankiinnaa i hoday

Waxaa cad in ay labada tuduc kala duwan yihiin, kolka lagu luuqaynayana waa in ay kala duwanaadaan. Taasi in ay jirto waxaynu ku garanaynaa laba tixood oo uu abwaan Hadraawi tiriyey labadaba waxaa ku

wada jira labadaa habdhac ee aynu kor ku sheegnay. Waxaanan moodi jiray in uu ogaan miisaanka u jebiyey, waxay se u dhow dahay qudhiisu in uu ogaa baarcadduhu in uu labadaas siyood oo wadajira u dhaco. Bal u fiirso Hadraawi waxa uu sameeyey tixdiisa *Bulsho:*

Caroog kulul baa balwaday
Babtiisii baa la naxay
Dad baa isu soo bulladay
Dhankee babbisadu jirtaa
Baquhu yuu saaran yahay

U Fiirso haddana isla tixdaas:

Ninkii ballankaaga qaaday
Ka baaqday xilkaad u dhiibtay
ka baydhay ujeeddadaada
Buurtuu koray waarin mayso
Kub iyo bawduu ka jabay

Tuduca hore miisaankiisu waa sidan:

6:4 Ninkii waallaa la waa
7:3 La waayoo la heli waa
8:2 Bal naagtaa badhida daya
9:1 Bal buluqbuluqdeeda daya
10:0 Hoh iyo Boholaha Xargega

Ka labaadna waa sidan:

8:3 Haddaan casarkii carraabo
8:3 Haddaan dawga cagta saaro
8:3 Cid uun baan heli lahaaye
8:2 Casaankiinnaa i hoday

Masaldan arrinka xiisaha lihi wuxuu yahay, labadaa miisaan, sida aynu kor ka aragno, ka dheeri meeriska uu ku hooraa mar walba wuxuu la mid yahay miisaanka gaaban meeriskiisa badhtanka ah ee 8:2.

**Heesta ilmaha:**
8:3 Ninkii dila ee dagaala
8:3 Ninkii duur kulul ku jiida
8:3 Ninkii daymada ku maaga**
8:3 Dagaal baa naga dhexeeya

Labadaas jaad (jiiftada iyo baarcaddaha) ayaa ugu badan waxa loo yaqaan “hees muusig”. Marka se la lee yahay ”hees muusig” run ahaantii ma aha jaad maanso oo gaar ah, waayo dhammaan miisaannada kala duduwan kii la doonaba laxan waa la saari karaa sidii la doonana loogu luuqayn karaa, xitaa gabayga. Sababta keentay jiiftada iyo baarcaddaha in badanaa muusigga loo adeegsado waxaynu ku sheegi karraa laba sababood: 1) in ay lee yihiin habdhac aan aad u dheerayn aadna u gaabnayn; 2) in ay heleen sumcad weyn ka dib markii loo adeegsaday dano casri ah laga soo bilaabo sannadihii 40-nadii qarnigii tegay, danahaas oo ay jacaylka iyo siyaasaddu ugu waaweyn yihiin.

Heesaha kale ee sida kuwaas hore iyaga oo isku mid ah kala jaadka la moodo waxaa ka mid ah kooxdan iswadata luuqda se lagu kala yidhaahdo:

**b) Wiglo:**
10:4 Balaayo rag baan u badiyaayoo
9:3 Birtay nimay gaadhay baan ma leh

**t) Hirwo:**
11:3 Anigu hirwo haabigeed ma hayee
9:3 Haweennada haygu soo jebin

**j) Dhaanto:**
10:4 Cayaar anan joogin cawdubillee
9:3 Miyey carfi caado lee dahay

**x) Heello:**
10:4 Hubsiinadu way hagaagsan tahee
10:4 Hadhow iyo mooyi hawlo dambee
10:3 Horjooggaagu heello igu dhali

Waxaa hadhay oo buugga Miisaanka Maansada Soomaaliyeed lagaga baaraandegay miisaannada la kala yidhaahdo: buraanbur, heesta geela, selel (salsal) oo laba miisaan leh, heesta kebedda oo ugu yaraan laba miisaan leh, heesaha maqasha iyo carraynta geela oo isku miisaan ah, iyo ta mooyaha oo iyadu geeraar ah.

Waxaa se jirta hees kale oo badarka lagu tumo oo leh miisaan ka duwan ka geeraarka. Taasi waxay noqotay heesta af soomaaliga ugu nud yar ilaa imika inta la baadhay. Taasina waa sidan:

Mooyaha
Malablaha
Magicii
Mooyaha
Mooyaan

Markaa iyadana saddex sal ayaa lagu miisaami karaa:

2:2 Mooyaan
3:1 Mooyaha
4:0 Malablaha

**Heesta shimbiraha:**
Waxaa jira miisaan aynu u bixin karro "heesta shimbiraha". Sidaas waxaynu u nidhi iyada ay carruurtu ka daba tidhaahdo kolka ay shimbiraha qaarkood ciyayaan. Tusaale ahaan guuguulaha waxaa laga daba yidhaahdaa:

Guuguugu
3:2 Guuguule
Guuguugu
3:2 Guugii da
Guuguugu
3:2 Geelii dhal

Qollayda kolka ay labka iyo dheddiggu haasaawayaan ta dheddig cideeda waxaa lagu sheegay in ay ka cabanayso labkeeda oo hawsha reerka ku dayacay, waxaana la yidhi waxay lee dahay:

Beenaale
Baabbi'iye
Baylihiye
Beer lumiye

Waa kaa miisaanka uu abwaan Hadraawi ka unkay maansadiisa lagu magacaabo **Hal iyo halkiis.**

## 5. Fiirooyin gaar ah

Baadhitaanka xeerka miisaanka maansada Carraale wuxuu ku saleeyey tirada iyo tusmaynta shaqal dheeraha. Waa si habboon, waa se in aynu ogaannaa in ay tahay doorasho aan khasab ahayn, waayo shaqal gaabka qudhiisa waa lagu baadhi karaa. Dhanka kalena tusmaynta alammada marka la istusaalaynayo in erayada meeriska la raro, si arrin loo sugo ama mid kale loo buriyo, iyadana waxaa ka furan doorasho kale. Taasi waa in aan erayada la rarin ee mar walba alammada loo dan lee yahay uun tusmada loo dan lee yahay lagu meeleeyo. Sida uu Carraale yeelay iyada oo mar walba qumman, haddana waxay akhristaha siin kartaa fahan qaldan oo ah in lagu khasban yahay erayo meeris ku dhisan in iyaga uun la rogrogo.

Qodob kale oo isaguna xusid mudani wuxuu yahay, Carraale kolkii uu dhismaha maansada sidaas fog u qeexayey, hawshaas badanna geliyey, waxaa hubaal ah in uu ogaan isu moogaysiiyey tiir la wada og yahay in aan la'aantii maanso istaagi karin. Tiirkkaasi waa qaafiyadda ama xarafraaca. Sababta keentay qaafiyadda in uu indhaha ka laliyo waxaynu ku sheegi karraa isaga oo malaha u arkay wax aan xusid mudnayn mar haddii lagu wada baraarugsan yahay. Ha ahaatee marka sidan cilmiga ah arrinka looga hadlayo in qaafiyadda abuurteeda la baadho, lana raadiyo barta ay meeriska kaga dhacayso, waa qodob aan sinaba uga qiimi yarayn arrimaha kale.

Qaafiyadda in la baadhaa muhimmada ay lee dahay waxaa ina tusaya laba arrimood:

1. In la arko meeris lagu xaday qaafiyad aan dhab ahayn ee beenabuur ah, taas oo mararka qaarkood aad u qaawan marar kalena yara asturan. Taasi badanaa waxay ka dhalataa laba xaaladood oo maansayahanka aan feejignayn hoosaasin kara, labadaas oo kala ah:

    a) in la miciinsado xaraf-qaafiyadeed aan erayga bilaw u ahayn ee dhexda kaga jira;

    b) in lagu qaldamo eray sidiisa hadalka ugu badan kaas oo aan xarafkiisu qaafiyadda buuxin karin xitaa haddii uu yahay dhawaaqii loo baahnaa sida *waa* iyo *iyo* iwm.

2. In ay qaafiyaddu meerisyada gabayga qaarkood gasho saddex ama afar goor halkii ay caadi ahaan laba jeer geli lahayd, hees ay ahayd in ay mar qudh ah gashana ay gasho laba goor.

Heesaha ay qaafiyaddu ku laba-dhacdo waxaa ugu badan heellada, jaadadka kalena waa ay gashaa. Gabayga oo ay qaafiyaddu laba meelood ka gasho (hojiska iyo hooriska) waxaa jirta mar ay ku saddex-dhacdo. Qaafiyadda saddex-dhaca ahi meeriskii gabayga ee labada qaar ahaa waxay u qaybisaa saddex qaar oo mid waliba ku taagan yahay miisaan u gaar ah. Habkaa waxaa ku qaybsamayaa waa hojiska oo adhaxda ka jabaya una qaybsamaya laba qaar oo sida buraanburka isugu dhafan.

U fiirso tusaalayaashan hoose ee gabayga ah:

**G**elbis dhacay dad-, w<u>ey</u>naha **g**abraday, **g**<u>aa</u>fka igu m<u>ee</u>rsan 6:2
Qurux **g**alac leh, **g**ole dh<u>ee</u>han iyo, bilicdan **g**<u>aa</u>sh<u>ay</u>say 6:2

Baddaa **r**uxantay, daad baa **r**ogmaday, oo **r**ajaa dhimatay
Kala **r**oore, been iyo **r**ibee, maa la kala **r**aysto

**A**boorkuba **a**llayl-, kuu dhisaa, **a**qallo waaweyne
Markuu **u**ruro, daartuu **a**byaa, la **a**shqaraaraaye

**B**ad wax mara, **b**arriga waxa jiriyo, **b**uuro dabadooda
In **b**ogliyo in, **b**aabbaca dhigtiyo, **b**aalka lagu duulo

Xaqa **d**uugmay, **d**uunyada la dhacay, **d**umarka ooyaaya

Nin ku **d**ilay adoo **d**agan hadduu, **d**igasho kuu raacsho

**G**ar adkaatay, xaajada **g**urracan, **g**uurti kala maagtay

Afkaan **g**aaxshay, uurkaan **g**untaday, **g**abayadaan daayey

Heellooyinkan soo socda ee labada qaafiyadood ku dhisan iyagana u fiirso:

Allaa i **b**adee caashaq waa **b**elo oo
Ma **b**uurra nimuu **b**arriinsadayoo
Jidhkayguu **b**eddeluu ka **b**uuxsamayoo
**B**akhtiin kari waayey **b**oog shidanoo
**B**urdahaan ku akhriyi in uu **b**axo

Haddaanay **m**uuqan oo la **m**agacdhabo
Oo aan **m**aqlo soortu way **m**alab

Sidaan kuu **b**artayba hurdada ma **b**ogtoo
**B**arkimaan hadba **b**eerka saaraa

Qaafiyadda heellada ee laba-dhacaysa in aynu ku tuhunno asal ahaan in ay ka timid laba meeris oo ka yimid maanso jaad kale ah oo la israaciyey, ka dibna aynu xal ka dayno kala jebinta labada qaafiyadood, waxaa inoo diidaya laba arrimood.

Waa ta kowaade, haddii aynu sidaas yeello waxa meesha ka soo baxaya uma naqaan jaad maanso oo jira. Tusaale ahaan waa maxay:

Haddaanay **m**uuqan oo
la **m**agacdhabo
Oo aan **m**aqlo soor-
tu way **m**alab?

Waa ta labaade, in ay jiraan meerisyo badan oo isla heello ah oo haddana qaafiyad qudh ah leh, taas oo caddaynaysa meesha in aan laba meeris oo la isku daray ku jirin ee uu yahay mid keliya. Tusaalaha hoose waxaynu arkaynaa laba meeris oo wada socda midkood in uu lee yahay hal qaafiyad ka kalena laba:

Siday **m**idigtayda joogtaabaan
**M**iliilicayaa daleel **m**adhan

**M**uddaan araggeeda **m**oogaayoo

Qalbigu hadba soo **m**irkacayaa

Caddaymahaas qaafiyadda la xidhiidha ee aynu gabayga iyo heestaba ku aragnay waxay muujinayaan aqoonta arrinkaas inoogu dhiman in aan fari ka qodnayn.

## Gunaanad

Sida aynu aragnay ogaanshaha iyo qeexidda xeerarka dhismaha maansada ee buugga "Miisaanka Maansada Soomaaliyeed" Carraale wuxuu geliyey baadhitaan badan oo uu la kaashaday aqoon uu lee yahay abuurta maansada: dhadhansi ahaan, curin ahaan iyo cilmi ahaan intaba. Saddexdaas qodob la'aantood uma ay suurtogasheen arrinka in uu sidaas aadka ah ugu gondadego dabadeed ka soo saaro natiijooyin madhaafaan ah.

Weydiinta hadhayse waxaa weeye, haddii la bartay shuruudaha loo baahan yahay si uu meeris maanso oo cuddooni u dhismo, ma dhici kartaa in tix la curiyo iyada oo aqoontaas lala kaashanayo? Warcelinta jeer hore ayaan anigu bixiyey waana MAYA. Haddii uu qof isku dayo in uu sidaas tix ku curiyo waxa ka soo baxaa waxay noqonayaan hungo. Waxaan aqoon jiray nin aad isugu hawlay barashada dhismaha gabayga af ingiriiska dabadeed isku dayi jiray in uu ku gabyo. Waxaa se dhacday in uu ku dayoobay isku hagaajinta erayada iyo higgaadaha, isaga oo sadarka uu qoraba dib ula cararaya oo xeerarkaas ku eegaya. Taasi waxay u diidday in uu wax gabay lagu sheegi karo soo saaro, dareen iyo afshaxannimo haba haba dambeeyeene.

Abwaan Gaarriye oo ku qanacsanaan jiray in barashada xeerka maansoyahan lagu noqon karo dhowaan wuxuu caddeeyey aragtidaas in uu ka noqday. Macallin Carraale isagu wuxuu buuggiisa ku qoray:

> "Iyada oo hal-abuurka maansadu ku hirgalo haddii hibo qof u dhashay uu ku kaabo dadaal ayaa waxaa jirta in haddii labada mid maqan yahay aanu ka kale tisqaadi karayn, iyada oo inta hibada ah la'aanteedu sii cawaaqib xun tahay."

In aanay maangal ahayn barashada aqoontan in maanso lagu curin karo aynu istusaalaynno. Hooriska meeriska gabayga oo sidii aynu soo aragnay aad uga xeer fudud hojiska, waa tii la ina tusay tusmooyinka 1-aad iyo 3-aad, ama 1-aad iyo 5-aad, ama 4-aad iyo 5-aad. Waxaana ka reebban in uu wada galo: 1-aad iyo 4-aad, ama 3-aad iyo 4-aad, ama 3-aad iyo 5-aad. Xeerarka kalena waaba ay ka sii hawl badan yihiin. Sidaas darteed, dhici mayso in aqoontaas barashadeeda maansoyahan lagu noqdo.

Waxaa se jirta si kale oo uu qofku ku baran karo. Taasi waa iyada oo habka meerisku u dhacayo maanka iyo dareenka la dhadhansiiyo, loo laylyo, sidaasna lagu qabatimiyo. Aqoontani waxay taraysaa uun barashada iyo ogaanshaha cilmiyeed ee dhismaha maansada.

Ugu dambayn hadalka aynu ku soo ururinno, miisaanka maansada qofba dhan uu kaga yimaaddaba waxa baadhitaanka u baahani waa afar qodob oo kii dhaawac galaba maansadu deelqaaf ku dhacayo.
Waxay kala yihiin:

1. Tirada shaqal alammada iyo intooda shaqal dheere ama shaqal gaab noqonaysa.
2. Tusmaynta barta ay shaqalladaasi meeriska ka kala gelayaan.
3. Sargoynta erayga xitaa haddii uu naxwe ahaan jabayo.
4. Xarafraaca (qaafiyadda) iyo barta ay gelayso.

---

*Tusaale aan buugga **Miisaan Maansada Soomaaliyeed** ka soo guuriyey.
**Tusaale aan qudhaydu curiyey.

Ibraahin Yuusuf Axmed “Hawd”
Ibraahinhawd@hotmail.com